

# GOD'S SIMPLE PLAN OF SALVATION FROM LUKE

## 1. We are all sinners!

Luke 5:31-32 Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Kuwa ladan dhakhtar uma baahna. Laakiin kuwa buka ayaa u baahan. Anigu uma aan imanin inaan kuwa xaqa ah u yeedho, laakiin inaan dembiilayaashase toobadda ugu yeedho ayaan u imid.

Luke 18:19 Markaasaa Ciise ku yidhi, Maxaad iigu yeedhaysaa wanaagsanow? Mid wanaagsan ma jiro mid maahee, kaasuna waa Ilah.



We are all sinners!

## 2. There is a price for that sin!

**Luke 16:15** Markaasuu wuxuu ku yidhi, Idinku waxaad tiihin kuwa dadka hortooda isku soo caddeeya inaad xaq tiihin. Laakiin Ilah waa garanayaa qalbiyadiinna, waayo, wixii dadka dhexdooda lagu sarraysiyaa, Ilah hortiisa waa ka karaahiyo.

**Luke 9:5-6** Kuwa alla kuwii aan idin soo dhowayn. markaad magaaladaas ka baxdaan siigada cagihiienna ka dhabaandhaba inay marag ka gees ah ku ahaato. Markaasay baxeen. oo tuulooalinka ayay dhex mareen, iyagoo injiilka ku wacdiyaya oo meel walbaba kuwa buka ku bogsiinaya.

## 3. Jesus died and paid for our sins on the cross!

**Luke 18:13** laakiin cashuurqaadihii meel fog ayuu ka istaagay, ma uuna doonaynin inuu indhihiisa cirka u qaado, laakiin laabtiisa ayuu garaacay isagoo leh, Ilahow, ii naxariiso anigoo dembi leh.

**Luke 19:10** Waayo, Wiilka Aadanahu wuxuu u yimid inuu kii hallaabay doondoono oo badbaadiyo.

**Luke 24:46** Wuxuuna ku yidhi, Sidaasay u qoran tahay, Waa inuu Masiixu silco, oo uu maalinta saddexaad kuwa dhintay ka soo sara kaco,



**Christ died for sinners!**

#### **4. Salvation is a free gift, not by good works. You must take God's word for it, and trust Jesus alone!**

**Acts 4:12** Mid kale badbaadada lagama helo, maxaa yeelay. ma jiro magac kale samada hoosteeda oo dadka dheddooda loo bixiyey oo waajib inoo ah inaynu ku badbaadno.

**Ephesians 2:8-9** Waayo, idinku waxaad ku badbaaddeen nimco xagga rumaysadka, mana aha wax xaggiinna ka yimid, laakiinse waa hadiyadda Ilaah, mana aha xagga shuquallada, si aan ninna ugu faanin.

**Titus 3:5** ayuu ina badbaadiyey. Inaguma uu badbaadin shuquallada xaqnimada oo aynu samaynay, laakiinse naxariistiisa aawadeed wuxuu inagu badbaadiyey nadiifinta dhalashadii labaad iyo cusboonaysiinta Ruuxa Qoduuska ah,

#### **5. You must put your faith and trust in Christ alone.**

Luke 13:3 Waxaan idinku leeyahay, Maya, laakiin haddaanad toobad keenin, kulligiin sidaas oo kale ayaad u lumi doontaan

Luke 18:17 Runtii waxaan idinku leeyahay, Ku alla kii aan boqortooyada Ilaah u aqbalin sida ilmo yar oo kale, meeshaas ma uu geli doono.

Romans 10:9-10,13 Maxaa yeelay, haddaad afka ka qiratid in Ciise yahay Rabbiga, oo aad qalbiga ka rumaysatid in Ilaah isaga ka sara kiciyey kuwii dhintay, waad badbaadi doontaa, waayo, qalbiga wax baa laga rumaystaa xagga xaqnimada, afkana wax baa laga qirtaa xagga badbaadinta. Waayo, ku alla kii magaca Rabbia ku baryaa, waa badbaadi doonaa.



*Haa, sidaasuu u sahlan yahay, kama ka shaqeysan karttid cafis ilaahay, cafis alle kama gadan karttid. Wuxaad ku heli kartaa oo keliya iimaan allaha weyn naxariistiisa. Haddaad rabtid inaad Ciise Masiix oggolaatid inuu noqdo badbaadiyahaaga, kana heshid cafis ilaahay, waatan duco aad ku duceysan karttid, dhihidda ducadan iyo doco kale toonna kuma badbaadin karaan. Ciise Masiix oo aad rumeyaaa waa tan kaliya oo ku siineysa dunuubta oo lagaa cafiyo. Ducadani waa hab/qaab/jid keliya oo aad alle ugu sheegeysid saad u aaminsantahay, ugana mahad celineysid siduu kuu cafiyo.*

### **“ilaahow”**

**waan ogahay inaan dambi kaa galay, astaahilana ciqaab, laakiin Ciise Masiix baa qaatay ciqaabtaabtaan astaahilay si imaanka aan ku qabo ciise la iigu cafiyo, Adigaan ku rumeeyey sii aan u badbaado. Waad ku madsantahay sarreyntaadda/sharaftaada cajiibka ah iyo cafiska! Amiin.**